# Xuquuqaha Da'yarta Waalidka ah

The Rights of Teen Parents

## Haddii aan ilmo dhalo anigoo da'yar ah, isla markiiba ma ka "xoroobayaa" waalidkay?

Maya, ku xoroobi maysid in aad ilmo dhashid. Xoroobidda macnaheedu waa aad adigu mas'uul iska tahay marka la eego xaaladaha qaarkood oo waalidkaan ay tanaasulaan xukunka iyo haynta. Macnaheedu ma aha in aad leedahay xuquuqaha qaangaarka oo dhan. Xeerarka xoraynta waa murugsan yihiin. Haddii aad ku nooshahay degmada Hennepin oo aad doonaysid macluumaad dheeraad ah oo arrintaas ku saabsan, wac Mashruuca Sharciga Dhallinyarda ee Kaalmada Sharciga Mid-Minnesota (Mid-Minnesota Legal Aid (612)332-1441. Ka wac xafiiska gargaarka sharciyada (legal aid) ee deegaankaaga 1-(877) 696-6529.

Eeg warqaddayada xogururiska ee *Xoroobid*.

## Haddii aan ilmo dhalo macnaheedu ma waxaa weeye in aan ka guuri karo guriga waalidkay?

Maya! Waxaad guuri kartaa oo kaliya haddii aad oggolaasho ka haysatid waalidkaa ama qofka sharci ahaan ku haya, aad tahay 18 jir, guursatay, ku biirtay ciidammada, ama aad haysatid amar maxkamadeed.

Haddii aad **ka yar tahay 18** sano jir oo aad guurtid, waxaa laga yaabaa in aadan helin MFIP, ka-soo-reebid baase jirta. Eeg *Barnaamija MFIP ee Waalidiinta da'doodu ka yartahay 18 sano*. Sidoo kale, la hadal shaqaalahaaga maaliyadda.

Haddii adiga ama ilmahaaga loo gaysanayo waxyeello ama wax idin gaaraan, waxaad leedahay xuquuqo gaar ah. La hadal qareen.

## Haddii aan degganahay guriga, ma hooyaday baa "iska leh" ilmahayga?

Xataa haddii aad ka yar tahay 18 oo ku nooshahay guriga, hooyadaa "ma laha" ilmahaaga. Xaq waxaad u leedahay gaartid go'aammada la xiriira nolosha ilmahaaga. Adigaa leh haynta sharciyeed iyo jireed oo ilmahaaga. Adigaa mas'uul ka ah daryeelka ilmaha. Tani waxay is baddali kartaa oo kaliya haddii ay maxkamadi haynta ilmaha siiso qof kale.



## Yaa go'aaminaya maga caa'ibada magaca dambe ee ilmahayga?
Labada waalid haddaysan is qabin markay ilmuhu dhasheen, hooyada ayaa go'aaminaysa maga lagu qorayo shahaadada dhalashada


## Ka warran haddii uu qof waxyeelleeyo aniga ama ilmahayga?

- Waxaad wici kartaa boliiska oo qofkaas ku eedayn kartaa weerar.

- Waxaad heli kartaa Amar Ilaalineed (OFP) oo u sheegaya weerarahaas in uusan u imaan karin adiga iyo ilmahaaga midna. Uma baahnid qareen si aad u heshid OFP. Aad guriga maxkamadda degmadaada ama xafiiska colaadaha qoyska si laguu caawino. Ama waxaad wici kartaa 2-1-1 ee gobolka oo dhan si aad u heshid xafiis kuu dhow OFP-gu waxa kale oo uu jidayn karaa haynta iyo booqashada ilmaha.

  Ka eeg warqadayada xogta aruursan ee *Amarka Amaan Helida iyo Amarka Khashkhashaada*.

  Akhbaar kale oo ku gal www.lawhelpmn.org/forms



  → Heli *"Abuse and Harassment"*
  → Riix *"Order for Protection Against Domestic Violence"*
  → Riix Somali/Soomaali

- Helidda talo xagga sharciyo waxtar bay leedahay. Haddii aad ku nooshahay Degmada Hennepin wac Mashruuca Sharciga Dhallinyarada ee Kaalmaynta Sharci Mid-Minnesota (612)332-1441. Haddii ad ku nooshahay degmo, ka wac xafiiska gargaarka sharciyada (legal aid) ee deegaankaaga 1-(877) 696-6529.

## Ma heli karaa Kaalmada Daawaynta (MA)?



Dumarka dakhligoodu yar yahay badankoodu way heli karaan (MA) markay uur leeyihiin. Haddii aad qaadatid MFIP, si tood ah baad u helaysaa MA. Wuxuu bixinayaa MA-gu dhammaan booqashada dhakhtarka, daryeelka deg-degga ah, daawada, iyo kharashka ummulinta. Haddii aadan heli karin MA, raadi xogta barnaamiyo kale sida Qorshaha Caafimaadka Carruurta (children's Health Plan) iyo Daryeelka Miinesota (Minnesota Care).

Haddii aad ka yar tahay 18, guriga ku nooshahay, oo dakhliga waalidkaan ka sarreeyo meel mucayin ah, in aadan MA helin baa laga yaabaa. Haddii waalidkaa leeyihin kaar caafimaad, baar in adiga ama ilmahaagu ku jirtaan caymiskooda.

Haddii aadan ahayn muwaadin Maraykan, waxaad u baahan tahay talo sharci oo xaaladdaada khaas ku ah. Degmada Hennepin gudaheeda wac Mashruuca Sharciga Dhallinyarada (612)332-1441. Haddii aad ku nooshahay degmo, ka wac xafiiska gargaarka sharciyada (legal aid) ee deegaankaaga 1-(877) 696-6529. Sidoo kale, eeg warqaddayada xogururiska *Daryeelada Caafimaad ee Dadka Aan Muwaadiniinta Ahayn*.

## Ma dhammayn karaa dugsi sare haddii aan ilmo dhalo?

Haa! Iskoollada badankoodu waxay leeyihiin barnaamijyo loogu talo galay waalidka da'yarta ah. Qaar waxay leeyihiin xarunta haynta carruurta. Wac waxbarashada deegaankaaga si aad u ogaatid barnaamijka ku caawini kara. Iskoolku kuguma takoori karo in aad uur leedahay ama aad ilmo dhashay. Haddaad rabtid in aad gashid fasallada caadiga ah, waa in ay kuu oggolaadaan.

Haddii iskoolkaagu uusan lahay xarunta haynta carruurta, bulshadaada ayaad ka heli kartaa bixiyeyaasha haynta carruurta. Waxaad kale oo aad dalban kartaa xarun haynta carruurta oo la kabo.

## Waa maxay macnaheedu sugidda "aabbenimo"?


Waa marin sharciyeed oo go'aaminaya qofka ah aabbaha ilmahaaga. Waxaa loo sameeyaa 2 siyood:

- Labada waalidba waxay saxiixi karaan bayaan loo yaqaan Aqoonsashada Waalidnimo (Recognition of Parentage). Ama,

- Haddii aan aabbuhu saxiixin foomka, hooyada ama aabbaha ayaa fal aabbanimo geyn kara maxkamadda. Unugga kaalmaynta ilmaha (child support unit) "IV-D unit"-ka degmadaada ayaa maxkamad ka xeraynaya fal haddii aabbenimadu aaysan sugnayn. Eeg warqaddayada xogururiska *Aabanimada iyo Hayshada Ilmaha*.

## Maxay aabbenimadu muhiim u tahay?

Marka la sugo aabbenimada, ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay lacagta kaalmada carruurta. Markii aabbuhu dhinto, ilmuhu waa uu dhaxli karaa. Haddii aabbuhu dhinto ama uu noqdo hawlgab, ilmuhu in uu sooshal sekuuriti (social security) lacagteeda qaadan karo ayaa dhici karta. Aabbenimadu waxay kale oo muhim u tahay aabbaha. La'aanteed, xaq uma uu laha booqashada ama dalbashada haynta ilmaha. Haddi la xereeyo fal aabbenimo, la hadal qareen.



## Haddaan waalidku is qabin, yaa le haynta?

Haynta macnaheedu waa barbaarinta ilmaha. "Haynta kelida ah" ("sole custody") macnaheedu waa in hal waalid uu leeyahay barbaarinta. "Haynta la wadaago" ("joint custody") macnaheedu waa in labada waalid ay wadaagaan barbaarinta. Haddii waalidku aysan is qabin, markaas hooyada ayaa leh barbaarinta in ay maxkamadi go'aan kale gaarto mooyaane. Maxkamad ayaa go'aamindoonta haynta jireed (physical custody) oo ah (meesha ilmuhu ku noolaanay) iyo hayn sharci ah (legal custody) oo ah (yaa go'aammada u gaaraya ilmaha). Tusaale, maxkamaddu waxay amri kartaa in ilmuhu la noolaado hooyada, laakiin labada waalid ay wadaagaan xaqa go'aammo gaaridda. Maxkamaddu waxay go'aan ka gaari kartaa haynta markii la is furo, kiis aabbenimo, kiis amarka ilaalinta qof (order for protection) (OFP), ama kiiska marka la kala guuro.

## Waa maxay waqtiga waalidnimadu (soo booqashada)?

Haddii hooyadu ay leedahay haynta, waqtiga waalidnimada macnaheedu waa xaqa aabbuhu u leeyahay in uu waqti la qaato ilmaha. Maxkamaduhu hadda waxay u yaqaannaan booqashada "waqtiga waalidnimada." Markii la sugo aabbenimada, aabbuhu wuxuu maxkamadda ka dalban karaa in ay jideeyaan waqtiga waalidnimada. Maxkamaddu way diidi kartaa booqashooyinka, ama shuruudo ayay ku xiri kartaa, ayadoo laeegayo waxa u wanaagsan ilmaha. Haddii aabbuhu leeyahay xuquuqo waqtiga waalidnimada, hooyadu waa in ay u oggolaato in uu arko ilmaha, haddaysan jirin wax khatar ku ah ilmaha. Labada waalid kii doona ayaa tegi kara maxkamad si wax uga baddalo waqtiga waalidnimada. Eeg warqaddayada xogururiska, [Waqtiga Waalidka (Booqashada) iyo Qorshayaasha waalidka](#).

## Aabbeyaasha oo dhan ma laga rabaa in ay bixiyaan lacagta kaalmada carruurta?

Lacagta kaalmada carruurta waxaa bixinaya waalidka aan lahayn haynta ilmaha. Waxaana la siinayaa waalidka isagu leh haynta ilmaha. Waxaa bixin kara aabbaha ama hooyada. Kaalmadu waxay ku xiran tahay waxa waalidku awoodo in uu bixiyo iyo baahida ilmaha. Haddii waalidku da'yar yahay, iskool dhigto, ama aan kharash soo gelin, maxkamaddu ma xukunto lacag bixinta kaalmad carruurta. Waxayse waalid ku amri kartaa in uu shaqo raadsado, tababar qaato ama uu qaado tillaabooyin si uu mustaqbalka kaalmo u bixiyo.

## Caawimaadaha iyo Akhbaar

Haddii aad tahay waalid da'yar ah ama noqondoontid waalid da'yar ah, aadna doonaysid macluumaad la xiriira xuquuqahaaga, fadlan la xiriir:


**Degmada Hennepin (Hennepin County):**
**Youth Law Project**
Mid-Minnesota Legal Aid
111 North 5th Street, Suite 100
Minneapolis, MN 55403

Wac: (612) 332-1441



Haddii aad deggan tahay degmo kale, ka wac xafiiska gargaarka sharciyada (legal aid) ee deegaankaaga 1-(877) 696-6529.

Eeg buugayada gacanta ee [Xuquuqaha iyo Waajibaadka Waalidka aysan Xaasnimo u Qorneyn](#).
Waxaad kaloo la heli kartaa khadka (online) ee [www.lawhelpmn.org/so](http://www.lawhelpmn.org/so)



→ Geli "Xuquuqaha iyo Waajibaadka Waalidka" santiikhda baarida
→ Riix "Xuquuqaha iyo Waajibaadka Waalidka aysan Xaasnimo u Qorneyn"

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**